# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

| Opened: - 10:24 AM | Hansard No.25/1 | Kal-fadhiga 25$^{aad}$ |
|---|---|---|

***Fadhigii 2$^{aad}$ iyo 3$^{aad}$ 11-10/08/2014***

### Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 25$^{aad}$ oo socdey 2 Maalmood waxaa ka qeyb-galey 25 Mudane

1. **Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** Gudoomiyah, Mudanayaasha, Saxaafada iyo Marti-sharafta leh Marka hore Waad Salaaman tihiin, sida Warqada Ajendaha ka muuqata Shir-gudoonkuna inoo sheegay waxa weeye qeybtii ka hadhsaneyd Kal-fadhigii hore ayaa si badan uga muuqata ajendahan, marka hore gudoomiye waxaan jeclaan lahaa Sida Warbixinaha halkan ku qoran ee Gudidda joogtada iyo Shirgudoonka inay warbixin inaga siiyaaan wixi qabsoomey in iyana wakhtiyada soo socda lagu daro Warbixinada ugu horeeya Golaha Xildhibaanadu waxay ku noqdaan meelihii laga soo doortey ama ay war helaan markaa in warbixino laga dhageysto wixii cusub ee hadba soo kordhey oo Gobol walba Kalmad laga siiyo Xildhibaan Gobolkii laga soo doortey tagey.

   Xeerarka halkan ku qoran oo 10 xeer ah koley kama wada gaadhsiin karno, markaa waxaan u soo kala horeysiinaya sidan:-

   - **Xeerka Ilaalinta Duurjoogta iyo Keymaha**:- sababtaan sidaa u leeyahey waxa weeye wadanka waxaa ka jirta dhibaato aad u weyn oo xaga degaanka ah oo xaaluf ah oo xawayaan baa'ba ah oo xoolo baa'ba dadkuna ku hayaan waxna markii dhirtu dhamaatey ay iska baa'be'een, markaa Xeerkaa ayaan anigu ugu horeysiin lahaa halka uu iminka ugu dambeeyo.
   - **Xeerka Waxbarashada:-** isna xeerkaasi waa muhiim oo waxaan ka dhigayaa Xeerka labaad.
   - **Xeerka Nidaamka Xukuumada:-** sideynu la socono (Job description) oo Wasaarada iyo Hay'ad walba waajibaadkeed qeexa inta badan inooma jaango'na, waa Wasiir Magacow, Maareye Magacow ama Agaasime Magacow, had iyo jeerna nidaamka sideynu u garaneyno xukuumaduna u garaneyso waxa weeye in marka hore in jaangoyo Wasaarada iyo Hay'ad waliba Waajibaadka ay leedahay oo xukuumadii markii la sii kala qaad-

qaado oo Wasaarad walba hawl-maalmeedka iyo Waajibaadka ay leedahay loo sameeyo.

- **Xeerka Duulista Madaniga ah:-** sababta aan isagana ugu darey waxa weeye waatan Hawadeenii la isku heysto markaa bal ineynu hantiyi karno aan eegnee waa in isna muhiimad la siiyo, intaas ayaan ku soo koobayaa, inta kale dib inoogu dhiga, wa Bilaahi tawfiiq..

**Gudoomiyaha:-** mudanayaasha waxaan u sheegayaa Xeerarku waxay u soo kala horeynayaan sidey diyaar u kala yihiin, markaa xeerarka Golaha yaal ee Gudiyadu hayaan ha diyaariyaan sidey u soo kala horeeyaan baana loo galayaa.

2. **Md. C/raxman Cisman Caalin:-** Mudane Gudoomiye ajendaha anigu dhowr qodob ayaan taaban lahaa, anigoo marka hore uga mahadnaqaya shir-gudoonka sida wanaagsan ee u soo habeeyeen, Ajendahan Kal-fadhiga 25aad ee Golaha Wakiilada Xeerka ugu horeeya oo aan Golaha wali soo gaadhin ma haboona in loogu horeysiiyo waa in xaga dambe la mariyaa oo marka Xukuumadu xaq bay u leedahay in markaa ajendaha lagu daraa, sababtoo ah ma heyno Golahana ma horyaalo.

   Laba qodob oo kale waan calaamadin lahaa oo kala, Xeerka Nidaamka Xukuumada oo ku qoran numberka 3aad, Xeerka Gudidda heysa Xaq uma laha oo waa Gudida Joogtada waynu naqaan Xeerarka Gudidda Joogtadu qaabilsan tahey, Markaa Xeerka waxaa leh Gudidda Shuruucda ha loo wareejiyo Xeerka Gudidda Shuruucda.

   Xeerka Ka-hortaga Argagaxisada isna waxaa iska leh Gudidda Shuruucda markaa Gudidda Arrimaha Gudaha halaga qaado oo Gudida xaqa u leh ee Shuruucda ha loo gudbiyo oo Shuruucda sida loo kala leeyahey loo habeeyaa, sida gudoomiyuhu sheegayna waa in xeerarka Gudiyadu hayaan

3. **Md. C/raxmaan Muuse Jaamac:-** Shirgudoonka, Xubnaha Golaha iyo Xogheynuba way salaaman yihiin:-

   **Wax ka badalka Xeerka Diiwaangalinta** mar hadaanu Golaha iman waa in laga saaro, waxa loogu soo darayaana waa khalad mar hadaanu ina soo gaadhin.

**Xeerka Komishanka HIV/AIDska:-** xeerkaasi wuu inagu raftey labadii kal-fadhi ee u dambeeyay waynu heynay oo dhowr jeer baa gudiyo loo saarey markaa mar haduu intaa Golaha yaaley waa in Xeerka ugu horeeya laga dhigaa.

**Xeerka Duulista Madaniga**:- hawadeenii waa la isku heystaa, inaguna shuruucdii aynu caalamka hor-dhigi laheyn inaynu sameysano weeye, marka isagana xeerka labadaad ha laga dhigo.

**Xeerka Nidaamka Xukuumada:-** isaguna wuu yaal Golaha, waxaana heysa Gudidda Joogtada sida Gudoomihii hore ee Gudidda Shuruucduna sheegay waxaa iska leh Gudidda Shuruucda markaa Gudiddaa ha lagu wareejiyo.

**Xeerka Ilaalinta Duur-joogta iyo Deegaanka iyo Xeerka Tayada:-** qolada deegaanka iyo qolada tayada waxay leeyihiin waxaanu ku shaqeyno ma heyno (Xeer) markaa labadaa Xeerna ha la soo hor-mariyo, intaas ayaan ku soo koobayaa.

4. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** Shir-gudoonka, Mudanayasha iyo Saxaafada Marka hore ASALAAMU CALEYKUM, waxaan nafteyda iyo nafihiinaba waxaan u dar-daarmayaa in Ilaahey laga cabsado, Cabsida ilaahey waxaa ka mid ah in waajibka ina saaran sida uu yahey u gudano, markaa Waajibkeena aynu gudano, hadaan u soo noqdo Ajendaha, qodobka ugu horeeya ee Wax ka badalka Diiwaangalinta horta waa in la cadeeyo ma diiwaangalinta codeynta mise waa madanigii waa in la cadeeyo, markaa haduu yahey kii Codbixinta waa in la raaciyo Codbixiyayaasha.

   Inta aan hadaba xeerka la gaadhin aynu dib ugu noqono xeerka ma waxay wax inooga qabyo yihiinbaa mise waa wax lagu hawlgaleyba, hadii la bixiyay documents iyo wax lagu codeynayay, maxaa inaga inooga yaal, waa in loo yeedho horta intaan xeerka aynaan galin cidii ku shaqada laheyd ee ku hawlgaleysay ee qandaraasyada bixisey bal waxay ku saleeyeen qandaraasyada bixiyeen iyo wax inaga qabyo inooga yaal, markaa waa in lagu daraa cida loo yeedhayo Cida xeerkan ku shaqeysa ee ku hawlgaleysa.

   Xeerka Argagixisada iyo Xeerka Duulista Hawada ah anigu waxaan qabaa inay leeyihiin labadaa Xeer Gudidda Arrimaha Dibada ee aaney Gudiyada hayaa laheyn, markaa arrinkaa cid xeerarkaa leh dib ha loo eego, waxaynu galney heshiiyo khuseeya labada xeerba oo aynu hore u galney, maantana Somaliya

ayaa sheeganeysa heshiisyadii aynu galney oo la shaqeynsaa hay'adihii caalamiga ahaa ee xidhiidhka la sameynay, markaa waxyaabaheynu galney bal dib aynu ugu noqono ma waxbaa ka dhinaa.

Ileyn waxaynu galney inagoo saddex geesood ah oo Somaliya, Somaliland iyo Hay'addo Caalamiya oo wadamo la aqoonsan yahey ah baynu heshiis la galney, kuwii bay maantana Somaliya ka hadleysaa, waayo jawaabtii u dambeysa ee Somaliland bixisey 23kii bishii ina dhaaftey, markaa hadeynu waxaynaan gacanta ku heyn maalin walba ansixino oo wakhti inagaga lumo waa dhib, marka hadii wakhti inaga lumayo mid wax inaga dhaqaya ee wax inoo qabanaya aynu ansixino, Marka waxaan leeyahey wixii xeer ah ee Caalamka isku keen xidhaya eel eh Argagaxiso, Maxaabiis iyo wixii cid heshiis la galeyno aynu hubino wixii ka qabyo ah labadaa Xeerna aynu hakino.

**Kala horeysiinta Xeerarka Ajendaha ku qoran, anigu waxaan ugu horeysiin lahaa:-**

**Xeerka Bangiyada** oo in badan Golaha horyiil soona noqnqodey, kan labaad ha laga dhigo, **Xeerka Hay'adda HIV/AIDska** oo ah aafo ina hortaal wixii ay ku shaqeyn laheyn aaney wali sameysneyn, **Xeerka Nidaamka Xukuumada** kan saddexaad, **Xeerka Waxbarashada Qaranka** an afraad, Xeerka Hay'adda Tayada kan shanaad ha laga dhigo, **Xeerka Caasimada** kan lixaad, markaa lixdaa Xeer waxba yaynaan is culeysine aynu ansixino.

Duruufaha manta dalkeena ka taagan waxaa ka mid ah qabyaalada oo ah aafo dabiiciya waxayna soo gaadhey manta in la yidhaahdo habar heblaayo, beelihii kale ee dalka lahaa la ilaawey meeley ay ku jiraa, saxaafadeenii iyo media si xun u galey, dhaqankeenii xumeeyay, markaa waxaan leeyahey oo soo jeedinayaa Xeerkii Public Order Lawga hala soo celiyo oo wax ka badal iyo kaabis ha lagu sameeyo oo qabyaalada iyo saameynta ay leedahey oo saxaafada laga mamnuuco ineynaan isticmaalin, oo suldaan iyo odey meel qabyaalad kaga hadla oo shir ku qabta la shaacin ha noqdo muxaafid ama mid mucaarad ah, markaa waa in xeerka public order lawga la soo celiyaa oo lagu daraa qabyaaladan ina saameysay ilaa da'yarteenii, wa bilaahi tawfiiq.

5. **Md. Ibraahim Axmed Heybe:-** bismilaahi raxmaan raxiim, shirgudoonka waan ku amaanaya ajendahan ay soo diyaaryeen, anigu waxbaan ku darey, waxaan ka kowaad ka dhigey in dood laga yeesho Miisaaniyada Golaha, waxaan uga jeedaa waxaynu hore isula qaadaney in Gudi waliba ay soo sameysato Miisaaniyad u gaar ah oo ay ku shaqeyso oo Goluhu Miisaaniyada ugu daro, markaa kaas ayaan wax ugu horeeya ka dhigayaa Xildhibaanaduna waa iney secondment ku siiyaan, waayo had iyo jeer dhibaatoyinka ina heysta waxay tahey Golaha waxa shaqadiisa kowaad iyo sharc-dejintiisu inay gudiyadu hawlgalaan, hadaaney shaqeyn Gudiyadu Goluhu waa fadhiid dhibaataduna waa Miisaaniyad la'aan.

   **Xeerka Ganacsiga Bangiyada** oo dalku aad ugu baahan yahey, xeerar hore oo bangiyada ah waynu sii deynay, markaa kan aynu sii deyno, kan labaadna waan ka dhigayaa, kan saddexaad waxaan ka dhgayaa Xeer Mooshin ku yimi oo in badan Golaha horyaaley mooshin haduu yimaadona waa in wax walba la joojiyo oo mooshinka la gala, markaa **Xeerka Caasmada** ayaan saddexaad ka dhigayaa, Xeerka Xukuumada waxaan ku raacsanahey Xildhibaan Ibraahim Reygal oo waa in la helaa Wasaarad iyo Hay'ad kaastaaba in shaqadeedu cadaato dadkuna sidaa ula socoda, markaa Qodobka afraad ayaan ka dhigi lahaa.

   Xeerka Ilaalinta Duur-joogta iyo Keymaha kan shanaad ayaan ka dhigayaa, kan lixaadna waxaan ka dhigayaa haduu intaa ina soo gaadho Wax ka badalka Xeerka Diiwaangalinta oo sidii xildhbaanku sheegay intaan xeerka ka doodin loo yeedho Cidii Xeerka ku shaqo laheyd si wax looga weydiiyo.

6. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo martida waad salaaman tihii, Xeerarku waxay u badan yihiin kuwii kal-fadhigii hore, Xeerka Diiwaangalinta ee ugu horeeya Ajendaha waxaa heysa Xukuumada oo wali Golaha muu soo gaadhin, markaa Xeerkaa halaga saaro ajendaha mar hadaanu ina soo gaadhin, inta kale ajendaha waxaan u kala horeysay sida Xeerarka khuseeya arrmaha bulshada oo Matalan **Xeerka Hay'adda Tayada**, waxa ku jira ilaalinteenii oo caafimaadkii dadka ayaa ku jira, markaa xeerka ha loogu horeysiiyo.

   **Xeerka Waxbarashada Qaranka** ayaan ku xejiyay, waayo waxaynu soo galney iyadoo dugsi walba wax lagu dhigo oo College baa la yidhi qaarna jaamac, markaa waxay inagu noqon doontaa kaar jab, markaa qof walba yidhaahdo jaamac baan galey oo shahaado loo dhiibo waa qaran jab, marka waa in

waxbarashadeena la tayeeyo oo nidaam aynu u sameyno, Xeerka Ilaalinta Duurjoogta iyo Keymaha, waxaa laga cabanayaa roob la'aan dee wixii soo jiidi jirey ee deegaanka oo dhirtii baa'badey, markaa xeerkaasna waxaan ka dhigayaa saddexaad, Xeerka Duulista Hawada ayaan afraad ka dhigeyna isna aad baa loogu baahan yahey.

Wax kabadalka Xeerka Saxaafada ayaan ka dhigey kan shanaad oo aan isna meesha ku jirin oo aan ku soo darey, markaa Xeerka Saxaafada waa in lagu soo daro si loogu helo nidaam, kuwan kale Xeerarka waa in Gudi walba Xeerkeeda loo dhiibo oo loo qeexo Gudi kastaba Xeerkay ku shaqo leedahey.

7. **Md. Siciid Warsame Ismaciil:-** Shir-gudoonka iyo Xildhibaano waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka, waxaa lagama maarmaan ah in wax kasta laga horeysiiyo ilaalinta iyo jiritaanka Qarankan aynu meesha u fadhino, anigu waxaan aaminsanahey waxaad ka Hadley waxaa ka muuhiimsan marka la eego halka la marayo in qodobka ugu horeeya laga dhigo **Qiimeynta Xaalada Dalku marayo** oo ajendaha lagu daro,

   Markaan u imaado ajendahan waxaan qodobka labaad ka dhigayaa **Wax ka badalka Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha,** sababta oo ah marka la eego mudada ka hadhey doorashada waa in la helo Xeerkan wax ka badalkiisa, Xeerka Nidaamka Xukuumada ayaan Saddex ka dhigayaa, kan afraadna **Xeerka Hay'adda Ilaalinta Tayada**, shanaad Xeerka **Ilaalinta Duur-joogta iyo keymaha,** lixaadna **Xeerka Assaaska Hay'adda HIV/AIDska**, todobaadna **Xeerka Ganacsiga Bangiyda.**

8. **Md. C/raxman Yuusuf Cartan:-** waxaa fiican Marka la soo diyaarinayo ajendaha in Xogheyntu u soo liis-gareeyaan sidey u soo kala horeeyaan, Xeerkastaa waa muhiim oo makala muuhiimsana, bdhamaana waynu u baahanahey, kaabista Xeerka Codbixiyayaasha, xeer baynu sameynay doorashaa lagu galey, sidey sheegayaan Komishanku wuu ku hawlgaley, markaa ma Xeerkii oo aan Barlamaanku ansixin buu u hawgalayaa, Xeerku markuu inaga dhamaado oo xukuumadu hadey wax ka soo badasho aynu ku raacno ama diidmo ku ansixino ayaa Xeerka lagu shaqeyn karaa.

   Marka komishanku ma xeerkii hore ayay ku shaqeeyaan oo qandaraasyada ku bixiyeen, mise Xeerkii Xukuumadu haysay baa gaadhey, halkaa muhman badan baa ku jira Gudoomiye, markaa waa in muhmalka laga saaro oo Golaha

yimaado, inagu si fiican u eegno oo markeynu ansixino lagu hawlgalo weeye Xeerkaasi.

Xeerka Saxaafada oo labadii ajende ee hore ku jirey, qaran ahaana loo baahan yahey, xukuumada iyo saxaafadana isku dhacyo badan ka yimaadaan sababtuna tahey Xeer la'aanta, markaa maxaa sababay in Xeerkaasi ajendaha ka maqnaado hada miyaa la baa'biyay waa in laga jawaabo oo lagu soo daro Ajendaha.

Xeerarka Ganacsiga Bangiyada iyo Xeerka keymaha waa in xaga hore la soo mariyo, Ganacsiga Baananka marbeynu ka doodney, arrinta kale ee aan ka hadlayaa waxa weeye tii Xildhibaan Aadan soo jeediyay ee aheyd war Qaran Dimuqraadiya baynu nahey, waxaynu leenahay Saxaafad Madax banana, Xisbiyo ayaa inoo fura, waxaynu leenahey Baarlaman.

Marka meelo badan oo qofku fikirkiisa ka cabirayo ayaa jira, waxyaabahan xadhka goostey ee meel walba gaadhey ee Cadawgeenu ku farxayo ee qabyaalada ah, hadeynu Baarlamaan nahey aynu ku fakarno oo ka doodno sida anshaxa ah ee loo wada hadlayo, barigii hore saxaafadeenu local bay aheyd, iminka meel walba waa laga daawadaa Tvyadeena, Mediyuhu waa Global, waxyaabo dadka Somaliland inay burburto jecel baynu faafinaa, hadaanu barlamaanku hadal cid kale oo ka hadleysaa ma jirto, markaa waa inaynu Xeer ka soo saarno oo ka shaqeyno sidii aynu midnimadii qarankeena u ilaalin laheyn.

9. **Md. Cali Maxamed Xasan:-** anigu waxaan ka hadlayaa, waxaynu halkan kal-fadhiyadii hore waxaa lagu ansixiyay Xeer-hoosaad 10 minute inta Golaha loo qeybiyay duuduub lagu ansixiyay, dood dheer bay keentay oo waa tii Xeer-hoosaadkii wax laga badaley, waa tii Guurtidu dhex-dhexaad ka gashey oo go'aamadii la isla qaatey halkan lagu ansixiyay, isbadalka Xeer-hoosaadkii lagu sameeyay meel jaan iyo cidhib dhigey dib looma arag.

   Markaa sharcigii Goluhu ku dhaqmayay ee kula baxayay, halkaa laba kursi baa yiil mrkii u dambeysay iminka xagii sare baa la dhigey marka inay Xeerka ku taal baa loo baahan yahey, Sharciga lagu dhaqmayona inuu cadaado weeye, taasina waa wax qof walba xaq u leeyahey, Marka Gudoomiye Goluhu u baahan yahey Xeer-hoosaadkii u dambeeyay oo wax ka badalkii lagu soo darey in Mudanayaasha loo qeybiyo shir-gudoon ahaan, marka anigu qodobkaas uun baan ku soo darey, sidey Xeerka Ajenduhu u soo kala horeynayo Gudoomiyaha sheegay.

10. **Md. Axmed Maxamed Diiriye:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafadu way salaaman yihiin, waxaan leeyahey in la soo hor-mariyo:-

- **Xeerka Ganacsiga Bangiyada**
- **Xeerka Saxaafada Wax ka badalkiisa**
- **Xeer-hoosaadkii** Golaha sida Xildhibaan Cali sheegay waan waafaqsanahey, markaa Xeer-hoosaadkii wax laga badaley Golaha ha loo qeybiyo.

11. **Md. Xuseen Maxamed Cige:-** ASALAAMA CALEYKUMA, Qodobkan ka hadli lahaa waa la igaga horeyay, waxaa la inoo sheegay Xeerarku inay u kala horeyn doonaan sida Golaha u yaalaan, markaa Xeerna Xeer kama horeyn karo waxana ugu horeynaya Xeerka hadba yimadaadaan, hadii mar ay soo wada dhacaan waxaan u kala horeysiin lahaa oo aan ugu horeysiin lahaa Wax ka badalka Xeerka Diiwaangalinta oo aan wax ugu horeeya ka dhigi lahaa Ajendaha sida iminka uu yahey, waxaana laba kaga dhigi lahaa Xeerka Ganacsiga Baananka, Xeerka Golaha yaalna waaba laba Xeer oo kaliya.

    Arrinta kale ee laga Hadley ee qabyaalada anigu waxaan leeyahey ma wanaagsana in Golaha lagaga hadlo qabyaalad, mida kale qabyaaladu ma maantey timi mise horey u jirtey, maxayse manta u xumaatey waa su'aasha aan isweydiinayo.

12. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** anigu badin maayo, waxa kaliya oo aan ka hadlayaa Xeer-Hoosaadkii Golaha oo wax laga badaley ileyn Xeer-hoosaad la'aan ma shaqeyn karnee in kow laga dhigo baan rabaa, qodobka labaad ee aan Ajendaha ka saaraya waxa weeye Xeerka Caasimada, Xeerkaas Golaha waa lagu soo celiceliyaa, waxaana ka horeya Xeerkii kala xadeynta Gobolada iyo degmooyinka, moshinkii lagu keenayna muu aheyn Mooshin dhameystiran oo taliyaha Sharciga inta loo gubiyay uu yidhi wuxuu waafaqsan yahey sharciga, labadaa sababoodba Xeerkaasi meesha ma le'eka.

    Waxaa kale oo aan ka hadlaya wax ka badalka Xeerka Diiwaangalinta, diiwaangalinta waa in la xadido oo la qeexo, Xeerkii Diiwaangalinta Codbixiyaashuna wali Golaha ma soo gaadhin, sidii Gudoomiye Baashe sheegayna in Xeerkii yimaada ee Gudidiisa diyaar ka noqdo ee Golaha yimaada ayaa lagalayaa oo kala horeyntu muhiim ma ah, Xeerkaasina Golaha muu soo gaadhin, warka waxaynu ku heyna inuu ka yimi komishankii oo uu

xukuumada soo dhex jibaaxayo, mida kale marka la leeyahey Xeerka Diiwaangalinta, waa in lagu daro Codbixiyaayasha.

Xeerka Argagixisada, Xeerkaasi wuxuu u baahan yahey in hoos loo eego oo aan lagu deg-degin.

**Markaa anigu ajendaha:-**

- Waxaan ku soo darey Xeer-hoosaadka, waxaana ka saarey Xeerka Diiwaangalinta oo wali Golaha aan soo gaadhin, iyo Xeerka Caasimadana meesha ha laga saaro, intaas ayaan ku soo koobayaa.

13. **Md. Cumar Axmed Saleeban:-** Gudoomiye, waxa weeye sidii mudanayaasha iga horeeyay sheegeen waxa diyaarka ah ee inoo yaal baa la qabtaa, wax aan la keenin in laga hadlo maaha, taas waa mid, tan kale Xeerka Ganacsiga Baananka waa laga doodey oo doodisii baa lagaley, waa Xeer Muhiima, Shidaal baynu qoreynaa, arsaaq ilaahey baynu sugeynaa markaa wixii la inoo keenayo horta xagee la inoo soo marinayaa, Markaa Xeerkaasi waa in laga hadlaa oo kan ugu horeeya noqdaa ha la ansixiyo ama ha la diidee.

    tan labaad, inaga dad baa ina soo doortey, dadkaa ina soo doortey waxay doonayaan waa inaynu sameyno, xeer markeynu sameynayno waa inaynu baahida dadka ina soo doortey, 2006kii markeynu soo galney ayaan soo jeediyay ineynu sameyno Xeerkaa Tayada, dadkii wuu madhay waxaad arkeysaa kuwi yar yar oo farmasiga heystey oo iibinaya dawoyin dhacey, salidii baa la mida oo dhacdey dadkiina beer-xanuun baa wada haya, Markaa **Xeerka Tayada** waa inaynu soo horeysiino, intaas ayaan ku soo koobayaa.

14. **Md. Cabdi Maxamed Jaamac:-** Xeerarka ajendaha ku yaal waa wada muhiim, markaa anigu saddex xeer baan ugu soo horeysiin lahaa:-

    **Xeerka Ganacsiga Baananka:-** xeerkaasii mudo dheer buu inala yaaley, waa xeerka aynu wax ku soo saareyno, wax ku iibsaneyno, lacag ku helayno, markaa waa in xeerka la soo horeysiiyo.

    **Xeerka Nidaamka Xukuumada:-** xukuumadi hadey nidaam laheyn shaqeyn meyso, wax lagu kala baxo lama hayo, Markaa Xeerkaasina waa muhiiim.

    **Xeerka Duulista Hawada:-** madaama la isku heyso hawadeenii iyo duulistii in Xeer u yaalo waa muhiim.

**Xeer-hoosaadkii Golaha:-** meel uu Xeer-hoosaadkii yaalo ma heyno si loogu shaqeeyo, markaa Xeer-hoosaadka isna waa in lagu daro Ajendaha.

15. **Md. Maxamed Saalax Cige:-** Shir-gudoonka iyo mudanayasha waan salaamaya, ajendahani waxa ku jiraa waa wixii ka qabyoobey kal-fadhigii hore oo wax cusub kama muuqdaan,

Waxaan ajendaha ku soo darayaa anigu:-

**Xeerarka la ansixiyay** sababta ay u dhaqangali waayeen waa in Gudi waliba Xeerkii ay ka soo shaqeysay ee la ansixiyay ama marka la ansixiyo soo baadho sababta ay dhaqangali waayeen, sida Xeerka Saxaafada oo hore u dhaqan galey lagumana dhaqmo oo ninkii suxufi ah kii Ciqaabta Guud baa lagu dhaqaa, hadaad saxaafada weydiiso waxay sheegaysaa inaan dhaqan galin, markaa sababta uu dhaqan-galiwaayay, sidoo kale Xeerkii Nidaamka Garsoora ayaa la mida iyo Xeerar kale, waxaa kaloo jira Xeer la ansixiya oo markii lagu dhaqmey dhibaato keenay sida Xeerka Amniga Qaranka oo dhibaatadiisa dadweynaha ka soo baxay oo loo dadkii loo dhaceyo, qaar la iska qab-qabto.

**Xeerka Diiwaangalinta** waa xeer loo baahan yahey, waana xeer manta ajendaha ku jira, hadii laga saaro wuxuu ka mid noqonyaa waxyaabahha soo kordha, oo hadii lagu ansixiyona wuu ku jiraa**.**

**Xeerka Caasimada:-** Xeerkakala-xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka ayuu u baahan yahey in la waafajiyo oo horta kaa la keeno oo Xeerka Caasimada lagu badalo.

**Xeerka Ganacsiga Baananka:-** ajendihii horena wuu ku jiray oo aynu ku ansixiney buuq badan baa ka dhashey shirgudoonkuna wuxuu soo jeediyay in Gudi loo saaro, markaa Xeerkaasi waa xeer Culus oo wax badan u baahan, Markaa waa in Xeerka Cid gaar ah loo saaro oo aqoon iyo khibrad leh si ay Xeer tayo leh u soo sameeyaan, sidoo kale waxaa la mid ah **Xeerka La-dagaalanka Argagaixsada** isana u baahan yahey in Gudi loo saaro dib u soo eegta.

**Qiimeynta Xaalada Guud ee dalka:-** hadaan intaa Xeerarka kaga baxo, waxaan iyana taageerayaa soo jeedinta mudanayaasha ee ah Qiimeynta Xaalada Guud ee dalka oo laga dhigo qodobka kowaad ee ajendaha, awalba ajendayaashii hore waynu soo jeedin jirney oo laga doodi jirey wax dhib ahina kama dhici jirey, markaa in dadkii ina soo doortey inaynu arrinka dibu ugu

celinaa oo Xaalada Guud eegnaa waa mid muhiima waana in lagu daraa ajendaha.

**Xeerka Ciqaabta Guud:-** ajendayaashii horena wuu ku jirey, xeerkaasi waa Xeerkii dawladii hore ee Siyaad bare, meynaan garan waayin, waana mid aad loogu baahan yahey, markaa Xeerkaa Gudidda haysaa ha soo diyaariso oo aynu Ajendaha lagu daro, si aynu u laalno panel codeka oo xeerka lagu dhaqmo.

16. **Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafaduba way salaaman yihiin, ajendaha Kal-fadhiga 25aad qaabkan loo soo dhigey runtii wax badan ka badali maayo, sida ay u kala horeysona waxaan muhiimada kowaad siin lahaa Kaabista iyo wax kabadalka Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha, maadaama dalka doorasho sugeyso oo ay ka hadhsan tahey dhowr bilood, waxaynu la soconaa in Xukuumada hortooda uu yaaley Xeerkaasi mudo oo komishanka doorashoyinku lixbilood ka hor u soo gudbiyay, waxaa loo baahan yahey inay xeerkaa dag-dag Golaha ugu soo gudbiyaan, mar haduu ajendaha qodobka kowaad uu yahey.

Ajendaha inta kale waxba ka badali maayo, laakiin waxaan doonayaa inaan dhowr qodob oo muhiima inaan ku soo daro madaama Golaha Wakiiladu shaqadiisu aaney oo aheyn oo kaliya Xeerarka Ansixinootda, laakiin shaqadiisa ay ka mid tahey daba-galka iyo ilaalinta Siyaasada Dawladu dalka ku hageyso, Sidaa darteed Waxaan soo jeedinayaa in Ajendaha lagu soo daro:-

- **Qiimeynta Xaalada Dalka inuu Goluhu dood adag ka yeesho:-** waa markii u horeysay ee Dalka JSL dawlad kale laga dhex-dhiso oo baarlamaan lagu dhaariyo, waana halkii ugu hooseysay ee Somaliland gaadho intey jirtey, markaa waa qiimeyn lagu sameeyo waxyaabaha Gobolada dalka qeyb ka mid ah ka socda.

- **Wada Hadalada Somaliland iyo Somalia:**- waxaynu ognahey intii Xukuumadi dalka haysay ee 4ta sano aheyd loo fasaxay oo Golayaasha Sharci-dejintu u ogolaadeen inay la shiri karaan Jamhuuriyadii aynu madax-banaanideenii kala soo noqoney, markaa waa in Goluhu dood adag ka heesho waxyaabihii ka soo kordhay mudadaa wada hadalku socday, ma faa'ideynu ka gaadhnay wada hadalkaa jiritaankeenii iyo horumarkeenii marka la eego iyo siyaasadeedii ay beesha caalamka kula dhaqmeysay? Mise dib u dhac baynu kala kulanay iyo xidhiidhkii dawladaha caalamka oo xumaadey oo qaarkoodba u qaateen in aynu ka noqoney gooni-isu taagii.

- **Xeerkii Takaaliifta Wadooyinka:-** waxaan soo jeedinayaa in loo yeedho isla markaana dood adag laga yeesho Xeerkaa, waxaynu ognahay in lagu uruuriyay lacag badan oo Cashuurihii Gaadiidka iyo Xoolaha lagu kordhiyay, ardeyga dugsiyada laga qaadey, Qurba joogta lacag badan laga soo qaadey, Dawladha Carabta iyo Caalamka kale loo tagey, Markaa meel alaale meel wax marayaan iyo wax xisaab celin ah oo la inooga keenay ma jiraan, xeerkaana waxaynu ogolaaney mudo markuu shaqeeyo in dib la inoogu keeno oo aynu dib u qiimeyn ku sameyno, waxaan soo jeedinayaa markaa dib u qiimeyn aynu ku sameyno Audit madax banana ha la dalbo soo baadha dakhligii ina soo galay iyo waxa la qabtey.

- **Qandaraasyada la bixiyay:-** waxaynu ognahay in qandaraasyo badan la bixiyay qandaraasyadaana mad-madow badan baa saaran, markaa waxaan Golaha u soo jeedinayaa in Gudidda Qandaraasyada loo yeedho isla markaana Xeerkii Qandaraasyada Qaranka dib loo eego oo wax ka badal iyo kaabis lagu sameeyo oo Goluhu ha ka dodo.

- **Xuduudka dalka iyo Xidhiidhka Dawladha Jaarka:-** waxaynu ognahay in Xuduudihii xidhan yihiin oo dawlada aynu jaarka nahay siiba Itoobiya iyo Jabuuti oo dadkeenu si aad ah ugu safri jireen uu xidhan yahey isla markaa waxay ahaayeen labada dawladood ee kaliya ee Passporkeena wax lagu tagi-jirey, marka mad-madow baan baa soo galey Xuduudihiina way xidhanyihiin, Markaa muxuu Goluhu uga aamusan yahey, waa arrintaa aynu ka hadalnaa oo la ogaado wax arrintaa sababay ee Xuduudkii iyo xidhiidhkii xumeeyay oo Xukuumada looga yeesho si wax looga weydiiyo oo ugu horeeyo Wasiirka Arrimaha Dibada.

- **Xeerka Miisaaniyada:-** waxa markasta oo Miisaaniyada la inoo keeno la isweydiiyaa Xeerkii Miisaaniyada, sababta Xeerkii Miisaaniyada loo sameyn waayay, Sababta Gudidii ku shaqada laheyd u keeni la'adahay waa su'aan taagan, Markaa Ajendaha ha lagu daro Xeerkaa oo ha la keeno, Miisaaniyad bilaa Xeer ah sidey dalka uga ansaxdaa waa khalad, waxaynu ognahay lacagta bixinteeda, qaadisteeda iyo keydintaada meel kaliyaa laga wada maamulaa, aduunka ma dhacdo, sababta waxaasi u timina waa Xeer la'aanta, inagu dalka sharci-dejin baynu ugu magacaaban yahaye sababtuu ugu war-wareegayo la garan maayo, waa Xeerkaa la ansixiyaa oo lagu daro ajendaha.

- **Tvga Qaranka:-** qabyaalada laga hadlay, hore Guurtida Gudidda joogtadu way kala hadashey Tvga qaranka inuu joojiyo baahinta qabyaalada qaawan ee hadh iyo habeen ka baxaysaa, Tvga qaranku waa halka laga dheehdo jiritaanka iyo horumarka dalku gaadheyso hadba, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in Ajendaha lagu daro in Wasiirka Warfaafinta iyo Madaxa Tvga Qaranku Golaha u horyimaadaan su'aalana laga weydiiyo sababta Tvgu u noqdey meesha qabyaaladii kor u qaadey ee Guurtiduba ka qeylisay, horumarkii iyo waxqabadkii dawladnimona hoos uu ugu dhigay.

17. **Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijandhe):-** anigu Waxaan soo jeedinayaa ugu horeyn Gudoomiye Marka Ajendaha la sameynayo waa in laga qeyb-galiyaa Gudiyada waayo Gudiyadu waxay hayaan Wixii ajendaha lagu soo darayay ee lagu shaqeynayay, hadaan Xeerarka soo kala horeysiiyo, waxaan ugu soo horeysiinayaa, Xeerka Waxbarashada iyo Xeerka Saxaafada, dalkeenu wax badan buu u baahan yahey.

## Maalintii Labaad ee Dooda 11/08/2014

**Opened: - 10:02 AM** **Fadhigii 3aad**

18. **Md. Maxamuud Jaamac Cilmi:-** Shirgudoonka iyo Mudanayashuba way salaaman yihiin, Gudoomiye ajendaha waxa ugu horeeya ee Goluhu ku shaqeeya waxa weeye Xeer-hoosaadka, waxaynu nahey hay'adda kaliya ee Dastuurku sheegay ee Xeer-hoosaad leh, hadi wax laga badaley oo kaabis lagu sameeyay waa la keenaa oo aynu dib u ansixinaa, sharciba maaha in ajende la sameeyo inagoo xeer-hoosaadkii aan ansixin, markaa waa in ajendaha lagu soo daraa oo lagu tilmaama in kaabis iyo wax ka badal lagu sameeyaa.

Wadanku wuxuu ahaa 6 Gobol waxa la sameeyay 8 kale oo waxay noqdeen 14 Gobol oo wadanku leeyahey, markaa waa in la helaa xuquuqdii kaamilka aheyd ee 8daa Gobol lahaayeen iyo tiradii ay ku lahaayeen Wakiilada iyo Guurtida oo 500 oo qof bay noqonayaan Guurtida iyo Wakiiladu wax sharci ah oo yaalna ma jiro, **Xeerkii Gobolada iyo Degmooyinka Xeer Lr. 23/2007** waa in dib loo soo celiyaa oo wax ka badal iyo kaabis lagu soo sameeyo, si Goboladaasi Xuquuqdoodii u helaan.

Golaha Wakiilada iyo Guurtida marka la leeyahey maaney aheyn kuwii dalka shuruucda u sameynaya, miyaaney aheyn kuwii u sameeyay Xeer Lr. 14 ee u ogolaadey inay ku soo baxaan Ururadii ee sharciyada iminka Asxaabta ku yihiin, markaa waxay noqoneysaa iyaguna waxba kama jirayaan,

Anigu waxaan ku soo koobayaa Xeer Lr.23 ee Gobolada iyo Degmooyinka waa in la keeno oo ajendaha lagu soo daro si wax ka badal iyo kaabis loogu sameeyo.

19. **Md. Maxamed Jaamac Cabdi:-** Shirgudoonka iyo Xubanaha Golahaba waan salaamayaa, waxaan isku dayayaa dhowr qodob oo ajedaha ka mid ah inaan wax ka idhaahdo aragtideyda, hadaan toos u abaaro Ajendaha:-

**Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Diiwaangalinta Codbixiyayaasha:-** Xeerkaasi wuxuu habraac u yahey Xeerka Doorashada, oo marka hore waa inuu jiraa Xeerka Doorashada si loo helo Diiwaangalin, doorashadana waxaa ka horeeya inay xeerarkii doorashooyinku jiraa, waxaa aan jirin Xeerkii doorashada Golaha Guurtida, Golaha Wakiilada, waxaa isna wax ka badal u baahan Xeerkii Doorashada Madaxtooyada, markaa waxay u baahan tahey in marka hore aynu sameyno Xeerarkii doorashada oo inteynu cid u saarno Xukuumada iyo Golaha oo Xeeraka Doorashada waxa laga yeelay talo-laga qaato, kan aynu dib u dhigno, Sidaa darteed waxaan leeyahey Xeerkan Diiwaanglintu hada muhiim maaha ajendaha ha laga saaro oo kuwa dhiman aynu sidii aynu u heli laheyn sameyno.

Tan labaad, **Xeerka ilaalinta Duur-joogta iyo keymaha** oo xaga dambe ku qoran ayaan jeclaan lahaa in kan kowaad laga dhigo oo Xeerka Diiwaangalinta lagu badalo, sababtoo ah manta waxaad ka war heysaan in Duur-joogtii iyo keymihiiba digada laga dhigey, waxaynu u baahanahey in Gurmad loo sameeyo, waa meelaha aan la dareemeyn oo xoolihii meelay daaqaan bay la'yihiin, Xeerkaasina 23 sanadood bay inoo taaley inaynu sameyno, dalkiina keymihii iyo dhirtii la dabar jarayaa oo la goynayaa, sidaa darteed Xeerka waa in xaga hore la soo mariyaa.

**Xeerka Caasimada:-** horta Xeerka Caasimada xildhibaano ayaa Moshin ku keenay, inta hargeysa laga doorteyna caasimada malaha oo dad gaar ahi malaha waa mid dadka Somaliland oo dhan ka dhaxaysa, waxayna ku xidhan tahey **Xeerkii Kala-xadeynta Gobolada iyo degmooyinka**, iminka Gobolkii Hargeysa waxaa laga sameeyay laba Gobol oo kale oo kala ah Gabiley iyo Hawd, marka waxay u baahan tahey talo intaas ka balaadhan in dib loogu noqdo, Goboladaa Cusub ee la sameeyayna Dastuurku Xilkooda Xukuumada iyo Golayaasha ayuu saarey, sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah in Xeerkii Kala-xadeynta Gobolada iyo Degmooyinka la sameeyo, Xeerka Caasimadu isna halaga saaro Ajendaha waayo maaha mid manta inoo yaal oo la gali karo ilaa Xeerka kala-xadeynta la helo.

**Xeerka la-dagaalanka Argagaxisada:-** anigu waan akhriyay Xeerkaa, maaha mid aynu qaadi karno waxa ku qoran waa xeer farsamo iyo aqoon faro-badan inooga baahan, waa Xeer wax ku qoran Xuquuqaadka Dastuurka wax yeelaya, waa xeer iswaafajintiisa iyo habeyntiisu hawl-badan leedahey, mida kale inagu hada waynu kala deganahey oo argagaxisada iyo qaabka loola dhaqmayo inaynu faraqa gashano maaha oo u yeedhanee, Wixii dambiyo ee dalka ka dhacana waxaa ku filan Xeerka Ciqaabta Guud oo wax ka badal inta lagu sameeyo lagu daro, Markaa Xeerka ha lagu badalo Xeerka Ciqaabta Guud wax ka badalkiisa oo Ajendaha ha lagu soo daro. **Seconded.**

Xaalada dalka ha laga hadlo ayaa halkan laga soo jeediyay oo waxay sheegeen inuu dalku marayo halkii ugu xumeyd, waxay u soo tusaale qaateen meelo badan, dalka tuulo yar oo wax laga dhawaaqey waxba ma yeesho, dad reer Somaliland oo cabanaya oo dalka waxba ma yeeleyso dib baa looga heshiiyaa, hadii la yidhaahdo xukuumad baa laga dhex dhawaaqey arrin weyn maaha, waxaa taa ka xun arrinta ah ha la dhiso xukuumada ku meel gaadha oo laga dhawaaqay caasimadii taasina waa qaran ma jiro, Gudoomiyihii Golaha Wakiilada ayaa ka qeyb-galey, markaa taasi waa inay xisaabtan yeelatayaa Gudoomiyihii oo ina dhex fadhiya, Markaa sidaa darteed waxaa leeyahey Mudanayaal Ajendaha markeynu ansixino waa in qadiyada kowaad aynu arrinkaa ka dhiganaa oo aynu ka hadalnaa oo aynaan ka aamusin.

**Xeer-hoosaadka Golaha:-** Golaha Sharci la'aan laguma hogaamin karo, hada goluhu Xeer-hoosaad la saxeexay malaha, Xeer-Hoosaad waynu ansixiney is badal baa ka dambeeyay oo dhacey isna laguma darin oo inteynu ku ansixiney lama saxiixin, sidaa darteed waxaan leeyahey aynu Sameyno Xeer-hoosaadkii oo wixii kii hore laga badaley shirgudoonku wax ha inaga yidhaahdo oo ha inoo keeno. Intaas ayaan kaga baxay.

20. **Md. Siciid Cilmi Rooble:-** ASALAAMA CALEYKUM WARAX MA TULAAHI, anigu waxaan ka hadlayaa oo ajendaha ku soo darayaa, Maalin dhoweyd waxaa Wasiirka Arrmaha Guduhu ka hadlay Ciidamo, Shirkado Shidaal iyo arrimo kale, horta mudanayal awoodeheenii baynu iska qaadney, waxa weeye:-

**Xeerkii Shidaalka:-** horta Wasiir iyo Madaweyne toona Shidaal lama soo qaadi karo hadaan Xeerkii Shidaalku halkan ka soo bixin, waxaad ogeydeen qaskii dalka ka dhacey ee dagaaladu ka dhici gaadheen, waxaan naqdinayaa oo aan leeyahey waa qayru-sharci wixii Wasiirku ka Hadley, Markaa Waa in Xeerkii Shidaalku AJendaha ku darnaa oo ku jiraa, marka la ina leeyahey

Sharci-daro ayaa tihiin maaha mudo dhaaf baad tihiin ee waxa weeye awoodihiina baa la idinka qaadey, Gudidii Xeerka ku shuqul laheyd waa inay keentaa, Gudiyadu Wasiirka dar-jiidha waa inay u yeedhaa, markaa Gudidaasi waa inay Wasiirka u yeedhaa.

**Xeerka Argagaxisada:-** xeerkaa waxaa iska leh Gudidda Shuruucda, horena halkan waan uga jeeday markaa yaan nalaga qaadin anagabaa shaqeynee, waxa ku soo gunaanadayaa waa Xeer-hoosaadka halkan ayuu ka baxay oo laga ansixiyay, hadaad leedihiin labada Gudoomiye ku-xigeen maxaa loogu celiyay dee taasi heshiis bay ku timi, inta kale Xeer-hoosaadka waa la ansixiyay.

**Gudoomiyaha:-** waxaan idiin sheegaya, ajenduhu maaha mid cusub waxaa ku jira Xeerarkii ajendayaashii hore ka qabyoomey, marar badan baa laga dhawaajiyay in ajende cusub la sameeyay, markaa AJendahani waa waxyaabihi kuwii aad ka tagteen ee ka qabyoobey.

21. **Md. Maxamuud Axmed Obsiiye:-** Bacda salaam Waxaan ka xumahay marka ugu horaysa qaabkan xilkan aan imika u fadhino waa xil qaran waajibaadkiisuna waxaa weeye nin waliba rayi gaara buu wataa laakiin in la dhowro qaranimada wanaaga iyo anshaxa iyo in goluhu ahdaaftiisa ugu muhiimsan uu abaaro ee wixii khilaafaada aan meeesha jira soo dhigin.

Anigu waxaan qabaa xeerarka ugu horeeya ee u baahan in la ansixiyo ay ka mid yihiin Xeerka Hay'adda Tayada iyo Xeerka HIV/AIDSka waxaan u leeyahay waatii miisaaniyadii ugu horeysay malaha waxaa nasoo maray 3 miisaaniyadood waxaanu lifaaq raacinay iyo go'aamo in la keeno hay'adaha aan sharciga oo la horkeeno golaha, go'aankeenuna waa inuu daba galna yeesho, makraa kuwii inoo keenay in la ansixiyo waa waajib , daba galka kuwa kalena waa waajibka shir-gudoonku leeyahay.

Waxaan xusuustaa maalintii ugu dambaysay ee uu inoo Yimi Wasiirka maaliyadu inuu yidhi Madaxweynuhu warqad buu soo diray uu kaga jawaabayo go'aamadii uu Golaha Wakiiladu gaadhay ee Miisaaniyada ku ansixiyay, ilaa hadana sida malahayga ah may soo gaadhin jawaabtaas.

Waxaa haboon in wixii jawaab ah ee uu Madaxweynuhu ka bixiyey jawaabta inuu soo gaadho Gole weynaha si loo ogaado jawaabtaasi meesha ay ku tiirsan tahay.

Golaha Wakiiladuna waajib ayay ku tahay inay daba gasho Hay'adaha aan sharciga lahayn intaan Miisaaniyada la keenin hadii la keeno miisaaniyadaas

iyadoon hay'adaas sharcigoodi la keenin waa inaan markaas cid kale eersan ee waa inaan inagu is canaananaa waayo waa waajibaadkeenii oon dayacnay cidna inaan ku eedayno maaha, Markaa mar haday labadasi keeneen waa in deg-deg loo ansixiyaa maadaama ay keeneen si sharciyadii loo waafajiyo

Arrinta labaad ee ajandaha aan ka hadlayaa waxaa weeye Xeerka Ganacsiga Baananka, xeerkaasi muduu yaaley malaha laba jeerbaa la hordhigay golaha akhriskii koowaad, akhriskii labaad iyadoon go'aana laga gaadhin baa dib loo caliyay hadii xeerkaasi aniga aragtidayda uu xambaarsan yahay wax khilaafsan shareecada islaamka ama dastuurka in laga doodo kadibna laga saaro inta kalena la meel mariyo, sababtoo ah xeerkaasi waa xeer competitionka baananka furaya albaab inoo furaya sidii aan u heli lahayn maalgashi sidaan u heli lahayn wax - qabad waa waxyaabaha uu ictiraafku ku mid yahay een ka raadinayno dibadaha ee aan ku meeraysanayno ictiraafbaan doonaynaa.

Waa waajib Golaha saaran inuu xeerkaas uu meel mariyo, waayo mashaariic fara badana ayaa ku jirta, khaladka kaliya ee uu leeyahayna in laga ilaaliyo oo sidaas aan ku meel marino, markaas waxaan u arkaa in uu xeerkaas nagu raftay oo ina horyaalay markaa inaan waajibkiisa ka gudano oo isu dhaafino ayaa meesha ku jirta, waxaan doonayaa inaan taabtaato ama xeerarka kale sida loo soo dhigo ayaan ku taageeersanahay xildhibaanada in la keeno wixii diyaar ah, laakiin xeerka waxbarashadu muhiimadiisuu leeyahay duulista hawada.

Xeer baa jira talo so jeedin aan ka leeyahay, waa **Xeerka Nidaamka Xukuumada**, xeerka xukuumada waxaan qabaa  waa wanaagsan tahay in xukuumada qaabkay u shaqaynayso ay soo bandhigto laakiin waxaan odhan lahaa oon soo jeedin lahaa in xeerkaas curintiisa axsaabta mucaaradku ka qayb gasho waayo maxaan sidaa u leeyahay waxaan u leeyahay xukuumadu waa mid meerto ah maanta xukuumada kulmiye ayaa joogta bari xukuumad kale ayaa joogi karta oo xisbiga kale ah, markaa asxaabta hadaynaan xisbiyadu haday iyagu imika si kale u hadlaan maaha in iyaga xuquuqdooda la duudsiiyo, waa in saddexda xisbi isugu tagaan oo xukuumada iyo fikirka xukuumadnimo isku ban dhigaan oo ay marka dambe xukuumadu soo baas garayso oo ay Golaha keento, taasi waxay noqonaysaa wada tashigii uu dastuurku inagu waajibiyay oo ay xukuumadu raacday taasna amaan iyo bogaadin bay ku helaysaa xukuumadu midi mid ku tag waxba tari mayso dad iyo dalbaa loo shaqaynayaa waa inaan wada shaqayntaa ay noqotaa mid kow ka ah.

Markaa waa in loo dhamaadaa asxaabta mucaaradka ah iyo ka muxaafidka ahba in xeerka xukuumada la keenayo ay noqoto hadii kale waxay noqonaysaa hadii xukuumadii timaadaaba ay badasho oo ay mid kale samaysato xeerarkana waxaa loo soo sameeyaa inuu waaro oo intaas oo kun oo sano uu shaqeeyo hadii ilaahay nafta u daayo dadka.

**Xeerka diwaan-galinta** wixii xildhibaanadu ka sheegeen baan la qabaa xeer maanta yaala codbixiyaashu nama horyaalo marka la keeno uunbaa laga hadli laakiin imika ma yaalo. Xaalada dalku waa mid muhiim ah laakiin ogaada tii aan ku bilaabay baa meesha taal xildhibaanada waajibaadkoodu ka mid tahay Dastuurkaa siiyay Xeer-Hoosaadka Golaha.

**Waxaan kusoo gabagabaynayaa** xadiiskii nabiga SCW sidaa aad tihiinbaa la idiin maamulaa bahashii qabyaaladu cirkay gashay sidaa aad tihiin baa la idiin maamulaa waxaa sal u ah waa shacabka, shacabkana waxaa wakiil ka ah golaha wakiilada marka aan inagu ka dawowno oo umadaa aynu ka dawayno ayaan anigu qabaa inay bahashaasi yaraanayso laakiin hadii inagii aan ka shaqaynayno oon dhiiri galinayno xukuumadiina aynu leenahay yayna ku shaqaynin, xukuumadu iyaday waajibkeeda tahay inay cadaalad sugto.

Markaa waxaa weeye waajibaadka uu saaran yahay Wakiilo, Guurti iyo Madaxweynaba xilka koowaad ee iyagu saaran yahay ee la isugu keeni lahaa markaa waxaan leeyahay hadii aanu badalno waxaanu abuurnay oo shacabkaa aanu wakiilka ka nahay mooye wax banaanka nooga imid ma jiraan waa inaanu inagu is daahirinaa oon kow ka noqonaa si ay wax waliba daahir u noqdaan laakiin waxaa weeye maroodigu takarta saaran ma arkee ta ka kale saaran buu arkaa wabilaahi tawfiiq.

22. **Md. Maxamed Faarax Qabile:-** Mudanayaasha, Shir-gudoonka iyo Saxaafada waan idin salaamaya, **anigu waxaan qabaa Qiimeynta Xaalada Dalku marayo Golaha Wakiiladuna ku jiro waa in Ajendaha lagu daraa**, maaha mudanayaal inaynu iska indho qarino, manta waxaad aragtaa inay ay inagu daboolan tahey oo qof xanuunsanaya aan meel loo qaadin Karin, waxaynu ogsoonahey dhawaaqii ka soo baxay UNta ee inagu waaninayay xadgudubka, Golahaana ka masuul ah oo Xukuumda ku ilaalineysa sharciga iyo dhowrida Xuquuqda, waxaa maqan heshiiyadii Caalamiga ahaa ee lagaley, waxaa loo baahan yahey heshiiska kasta oo laga galey horta waa in la keenaa Golaha.

Hadaan Heshiiyada la keenin Goluhu Xeer Shidaal ma sameyn karo lama keeni karo, Mudanayaal Lacag baa la soo daabacaa saacada la doono iyadoo Golaha

Wakiiladu waxba ka ogeyn, cida Xukuumada ku daba-galiweyday waxay galeyso waa Golaha Wakiilada,

Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka ayaa laga hadlayay iminka, yaa magacaabi karna, Qodobka 10aad ee Xeerka Gobolada iyo Degmooyinka ayaa sheegaya, Degmo yar bay xukuumadu ku gashaa kaambeyn inay u magacawdo Degmo, markaa waa in dalka Xaaladiisa la qiimeeyo ayaa kaga baxayaa doodeyda.

23. **Md. Maxamed Cumar Aadan:-** dhamaan waan idin salamayaa anigu waxaan moodayay in laga hadlayo Ajandaha oo kaliya, waana daruuri Qofku hadii uu wax cusub keenayo Ajandaha ha lagu daro, dhanaka kale xukuumada waxba ka hadli mayo oo qawaaniintan aan haynaa badankoodu waxay ka yimaadeen xukuumada oo waa la sheegi karaa xumaan iyo samaan way yeelan kataa.

Waxaan ka hadlayaa Ajandaha sida loo kala horaysiinayo waxaana inoo muhiim ah in waxyaabaha Amaanka khuseeya in ay yeeshaan priority ga waxaan leeyahay ha loogu soo horaysiiyo

1. Xeerka Ladagaalanka Argagixisada
2. Xeerka waxbarashada Qaranka
3. Wax-kabadalka/kaabista xeerka diwaan galinta

Dabadeedto sidaa aan u wadno Ajanduhu yahay dhanka kale saxaafada xeer horanna waa jiray ayaan filyaan halkaana waxyaabo badan ayaa ka muuqda oo aan isleenahay sida dadku inoo qiimeeyaana waa ku jirtaa the fact aynu leenahay dad xornimada ka hadla oo figradahooda cabira waa wax qiimo wayn oo in la tuhmaa kuma jirto isla markaana waxyaabaha lagu hadlayaa waa in aanay wax-wax u dhimaya noqon oo waxaa aan doonaynaa waa in aan umad nimo abuurno oo hadii ninba meel ka yidhaa reer helbal iyo reer hebal waa mid aan wanaag sanayn umad nimada aan rabnaana waxba inoogama hagaagayaan.

Waxaan odhan lahaa Xeerkaa Saxaafada waa in dib u habayn lagu sameeyaa oo la yidhaa media oo mahalaha jaraa'iida iyo ku waasi malha kuma jiraane waa in la sameeyaa oo wax haga loo sameeyaa oo aan wax ka qabanaa waxaanan anigu taageersanahay in saxaafadu madax banaanaato waxaanan soo jeedinayaa in aan ku soo darno xeerkaa saxaafada intaa ayaanan kaga baxayaan waanad mahadsantihiin.

**24. Md. Siciid Maxamed Cilmi:-** waan idin wada salaamayaa dhamaantiin shirgudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha, Saxaafada iyo Marti sharaftaba anigu waan soo koob-koobaya xaga xeerarka shakhsiyan waxaan soo jeedin lahaa sida xeerarka sida loo kala horaysiinayo.

1. Xeer hoosaadka Golaha wakiilada Jsl

oo uu ka mid noqdo Ajandaha wanan sobobaynayaa xeer hoosaadka markii hore ee aan ansixinay ee aan majority ga ku ansixinay waana tii aad ogaydeenoo Golaha Guurtidu waan waanta ka galay iyo heshiis danbe dabadeedna uu ka soo saaray go'aamo, go'aamo dad lagu heshiisiiyaana xeer maahan.

Hadii markaa Goleheenana uu go'aamo odayaal inagu dhex dhexaadiyeen aan u Qaadano xeer iyada oo la inaga sugayo sharciyo iyo in aan ilaalino sharciga oo aan tusaale u noqono dadka kale hadii aan xeer u qaadano sidee ayay u arkayaan hay'adaha kale ee dawliga ah iyo dadweynaha kale ee xeerarka aan ansixino ee aan doonayno in ay ku dhaqmaan ayaa maraya jidkaa aan u jeexnay oo raadkeena ayaa la eeganayaa oo waxaa la leeyahay mar hadii golihii sharci dajintuba haduu u yaqaano sharciga talo odayaal gaadheen, waxay noqonaysaa in halkaa lawada maro.

Waxaana leeyahay waa in Ajandaha lagu daraa oo waliba Qodonka koobaad laga dhiga waayo in uu shirgudoonku sidii sii ahaado ayay inagu heshiisiiyeen ee xeer-hoosaadka kuma Qorna xeerka waxaa loo samaystaana hadii is qabad uu yimaado waa in lagu kala baxaa oo hadii aan aroorta wax isu qabsano ma waxaan u kala baxaynaa talo adayaal soo jeediyaan mise xeer ayaan ku kala baxaynaa.

Su'aasha meesha taalaa waxay tahay taladii odayaashu soo jeediyeen hadii aan xeerka la galin sharci ma noqonayso sharcina ma noqonayso ee waxaa muhiimada leh xeerka gacanta aan u taagnay waxaana soo jeedinayaa in aad igu raacdaan oo ka koobaad laga dhigo.

Xeerarka kale waxaan u kala hor-marinayaa waxaa si wanaagsan ugu hadlay Xildhibaan Obsiiyee Alle khar Hasiiyee xeerka tayada, iyo Xeerka HIV ga waayo waatii aan lahayn sharci haloo sameeyo oo miisaaniyad ayay qaataan waxaasiin lahaa kale oo aan ku soo xigsiin lahaa xeerka duur joogta iyo kaymaha oo ah xeer xaalad degdeg ah u baahan waayo waxaa jira xaalufin aad u baahsan, intaa markaan sidaa u dhigo waxaa kale oo aan ku soo darilahaa Axisixinta iyo kala xadaynta Gobolada waad ogaydeenoo Madaxweynaha

Jamhuurida Somaliland isaga oo ka duulaya in dalka la isku keenkeeno oo umada wanaageeda iyo dib-u heshiisiinteeda eegaya waxaa uu dhawaan deegaanka aan ka soo jeedo u Magacaabay Gobol anoo umahad celinaya Madaxweynaha marka aad ka timaado gobolkaa ee aad u timaado gobolada kale waayo maadaama aan ahay xildhibaan Qaran oo waajibaad ayaa igasaaran arinkaa taa waan soo jeedinayaa oo la sharciyeeyo ayaa loo bahan yahay .

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa marka warqada Ajandaha la inoo keenayo waxaa lagu soo qoraa Xeerarka ka soo noqda Guurtida iyo Xeerarka ka soo noqda Madaxweynaha waxaan leeyahay hala faahfaaihiyo oo la waadixiyo waayo way ku mahad sanyihiin in ay ku soo daraan waana in loo soo qoraa sida kuwa kalaba loo soo qoro ee liiska ah waxanan codsanayaa in fadhiyada danbe lagu soo daro, waxaan ku raacsanahay xildhibaanadii ka hadlay in xeerarka doorashooyinka la soo hormariyo waayo halka ugu horaysa ajandaha waxaa ku taala Waxkabadalka/kaabista xeerka diwaan galinta, sida hore loo sheegay xeerka diwaan galintu waa habraac xeerarkuna dastuurka ayay ka soo farcamaan oo dastuurku hadii aanu jirin xeerar ma jireen, markaa marka xeerka doorashooyinku samaysmaan ayay habraacyaduna samaysmayaan.

Waxaa kale oo aan ku dari lahaa hal Qodob oo ah shaqo oo aan xeer ahayn waxaad maqlayseex niman odayaal ah oo caasimada dhexdeeda oo karaamo dalka ku leh laakiin ay shalay jirtay qodob ay ka hadleen in dalka oo dhan uu Fawdo galiyay qodobkaa oo ah in ay dawlad dhisayaan, qodobkaasi sharci daro kaliya maahee waay fawdo qaran waayo waxay sheegeen in ay dawlad ku meel gaadha dhisayaa hadii ay doorashadu qabsoomi weydo.

Waxaan soo jeedin lahaa in maalinta koobaad ee aan ansixino Ajandaha in aan maalinteeda labaad Qaraarka soo saarno qodobkaa ku saabsan in aan dadka fawdo aan la galin dalka anan dadka u sheegno in ay is dajiyaan odayaashana aan u sheegno in ay sharcidaro tahay arinkaasi oo xurmada aan u haynana ay halkeeda ku haystaa.

Qodobkayga u danbeeya ee aan ka hadlayaa waa qodonka ku saabsan lacagta lasoo daabacayo oo xildhibaana ka hadlay oo uu yidhi hala soo galiyo lacagta baanku soo daabacayo waxaan jeclaan lahaa inteenan ninba shaquu soo hayn jiraye in laga dhagaysto oo lagu ixtiraamo.

Arinta lacagta soo daabicideedii salkaan baanka ah baan ahaan oo xeerkii ugu horeeyay ee la sameeyay waxaan ahaa ninkii Golaha wakiilada ka hor akhriyay, waxaana dastuurka ku qoran lacagta waxaa faahfaahiyay xeerkeedii,

lacagta golaha la keenayaa waa marka lacag cusub ama naqshadayn ama noodh cusub la samaynayo sida 5000kun Sl/sh/l ee hore ama 7000kun SL/sh/ ama la badalayo naqshada lacagta waa markaas oo kaliya marka la keenayaa Golaha wakiilada ee ma jirto aduunyada meel ay ka dhacdaa inta baanka dhexe yimaado oo uu yidhaa intaas oo bilyan ayaan soo daabacanayaa arintaa hala inga daayo waa foolxumee waad mahadsantihiim

25. **Md. Bashiir Tukaale:- :-** mudanayaal aad ayaan idiin salamayaa dhamaantiin waxaan halkan ku soo koobayaa arinta ajandaha iyo kuwa kalaba marka ugu horaysa waxaan u baahanahay ugu horay in xaalada dalka la qiimeeyo oo aan qiimayn ku samayno waayo dhan walba wuu inagaga soo higaagmay sida aad ka wada warqabtaan.

Dhanka kale waan in wada hadalada Somalia in aan ka hadalnaa oo aan qodob ajandahay ka mid ah aan ka dhignaa ayaan soo jeedinlahaa mudanayaal oo waxani in uu inaga dhabyahay oo aanu wax ciyaar ciyaara u noqon loo arko waayo abidkeed Somaliland ka may dhicin in maamulo laga dhex sameeyo Somaliland sida khaatumo oo aan waxba ka fogayn halka ciidamadeenu joogaan oo way isku muuqdaan.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa in xeerka takaaliifta dib golaha loogu soo celiyaa waayo mudadiisii way dhamaatay oo dib looga shaqeeyaa, dhanka kale xuduudaha dalka waad yaabaysaa hadii aad tagto wajaaladaa agteena oo dadkiii oo dhan ayaa tuman meeshaa oo kii caafimaad u baahnaa iyo waraaqo kaga xidhnaayeenba halkaa ayay ku godoonsanyihiin oo xukuumadu intaa way ku noqnoqonaysaa waayo waxaanay fulin shuruudihii lagu xidhay oo tusaale ahaan waxaa joogo qolooyinkii dhaantada ee kilirka shanaad inana dadkeeni ayaa halkaa tuman waana la inoo dhaanto imanayaa.

Siyaasada arimaha dibada waa in wasiirka loo yeedhaa oo la waydiyaa halka ay wax marayaan. Doorashooyinka xeerkii golaha lagu soo doortay ku meel gaadh ayuu ahaa ee waa in dib loo eegaa kaaba oo tusaale ahaan waxaan rabaa inta xubnood ee ay Gabilay yeelanayo iyo xuduudeheedii goboladakalana waa in sidaa oo kale loo cadeeyaa oo tira koobkooda la hayaa waayo shalay ayay ahayd markii Hargeisa iyo salaxlay ay is dili gaadheen.

Anigu waxaan qabaa in marka hore la helo xeerka shidaalka oo aan la soo hadal qaadin qodis shidaal ilaainta aan ka baxay no qabyaalada lagu qoranayo ciidamada la leeyahay waa ilaalada shidaalka oo aan ahayn ciidan shidaal ee ah kuwo waxyaabo kale lagu qabanayo waxaanan halkaa halgu soo daro odhan lahaa xeerka qabyaalada.

Waxaa kale oo jira odayaal ka hadlay arimo aan sharci ahayn oo soo dhex fadhiistay xisbiyada qaranka oo anan garanayn sida ay u ogaalaadeen xisbiyada qaranku in ay dhex fadhiistaan oo ka hadlayay in xukuumad ku meel gaadh ah la sameeyo hadii doorashadu dhici waydo adayaashaa mid ayaan leeyahay oo waxaan leeyahay sharciga ha qaataam oo xisbiyada mid kood ha ku faylaan waanad mahad santihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ------------------------------------------------ | ------------------------------------------ |